

Shaf-ku-qabashada Hooyada ee Nuunnaha Dhiciska ah

Nuunneyaasha dhasha iyaga oo aan sidkoodii u dhamaan waa in lagu hayo qeybta daryeelka dhallaanka. Waa in ay hooyadu ku dhawaato nuunnaha oo ay sida "kaangaruuga" oo kale u sameyso shaf-ku-qabasho. Caafimaad ayey u tahay inay hooyadu nuunnaha shafka ku qabsato!

Waa maxay shaf-ku-qabashada ama habka kaangaruuga?

- Shaf-ku-qabashada ama habka kaangaruuga waa markay hooyadu shafka ku qabato nuunnaha. Waa inuusan nuunnuhu xirneyn dhar, aan ka ahay xafaayad keliya.
- Jirkaas is taabanaya labada dhinac, waa inaysan dhar u dhaxeyn labadaba, oo ilmaha ayey caafimaad u tahay oo ku diirsanaya.
- Waa in ay hooyadu intii suurtagal ah sameyso shaf-ku-qabashada inta uu nuunnuhu joogo isbitaalka iyo marka guriga la joogo ee ka dib marka nuunnaha isbitaalka laga saaro.



Shaf-ku-qabashada waxay caawisaa ilmaha dhiciska ah:

- Si ay diirrimaad uga helaan
- Si ay u neefsadaan oo uga helaan hurdo fiican
- Si ay u dareemaan jirka hooyadood
- Si ay isugu diyaariyaan in la nuujiyo

Shaf-ku-qabashada waxay caawisaa hooyada:

- Si ay u yeelato caano badan
- Si ay u dareento jirka ilmaheeda
- Si ay u barato waxa nuunnuhu u baahan yahay



Yaa sameyn kara shaf-ku-qabashada?

- In ilmaha dhiciska ah loo sameeyo shaf-ku-qabasho waa badqabid. Xataa nuunnaha ugu yar ayaa sidaas dareemi kara.
- Hooyo, aabbe, ama waalid kasta ayaa samayn kara shaf-ku-qabashada.
- Mataanaha xataa waa in loo sameeyo shaf-ku-qabashada.
- Kalkaalisada ama dhakhtarka weydii shaf-ku-qabashadu sida ay ugu fiican tahay nuunne kasta.



Sidee baa loo sameyn karaa shaf-ku-qabashada?

- Kalkaalisada nuunnaha ayaa kugu caawineysa sida shafka loo saaro.
- Dhar gacma-gaab ah ayaa ku caawin kara in ay hooyadu shafka si sax ah u saarato nuunnaha ay dhashay.
- Qorsheyso in aad ugu yaraan 60 daqiiqo haysato nuunnaha.
- Waxaad caanaha ku lisi kartaa mashiinka ka dib markaad sameyso shaf-ku-qabashada. Hooyooyin badan ayaa sheegay in ay shaf-ku-qabashada nuunnaha ku yeesheen caano badan.